# SSI ga Dadka Aan Muwaadiniinta Ahayn

SSI For Noncitizens

## Waa maxay Sooshal Sakuuratiga (SSI) gu ciddee ayaase heli karta?

SSI waa barnaamij bil walba lacag joogto ah siiya dadka dakhligoodu hooseeyo. Hadaba si’aad u heshid SSI, waa inay da’daadu tahay 65 sano ama aad ka wayn tahay ama aad tahay qof naafo ah oo aan shaqaysan karin. Waxaa jira shuruudo iyo sharciyo badan oo kaa hor istaagi kara lacagtan hadii aadan haysan Dhalashada wadanka. Xataa waxaa laga yabaa in adiga oo haysta deganaanshaha rasmiga ah ee Maraykanka da’daaduna ugu yaraan tahay 65 sano ama aad naafo tahay in laguu diido lacagta SSI.

## Si’aad u heshid SSI adigoon haysan dhalashad wadanka, waa inaad buuxisid mid kamid ah 3 shuruudood ee waxda socdaalku (immigration) ku xidhay:

1. Waa inaad tahay qof asal ahaan ka soo jeeda hindida maraykannka loogu yimid laakiin ku dhashay wadanka Kanada (Canada)
2. Waxaa kale oo aad SSI ku helaysaa hadii arjigaaga la buuxiyay ka hor bishii Janaayo 1, 1979

   ***AMA***
3. Waa inaad tahay qof **“Buuxiyay shuruudaha”** isagoon dhalashada haysan

## Sideen ku ogaanayaa in aan ahay qof “Buuxiyay shuruudaha” anigoon dhalashada haysan?

Hadii aad

- haysatid **degenaanshaha rasmiga ah ee dalka** isla markaana, ay waaxda socdaalka iyo dhalasho bixintu ay si sharci ah kugu siisay deganaanshaha rasmiga (INA).
- Ama lagu siiyay **magangelyo siyaasadeed**.
- Ama **Xabsi maraykanka gudihiisa ah** lagaa sii daayay ugu yaraan hal sano ka hor.
- Ama si **ku meel gaadh ah loo hakiyay masaafurintaada** ama **si buuxda loo joojiyay masaafurintaada**.
- Ama lagu siiyay nooca fiisada loo yaqaan**T-visa** ee la siiyo dadkaay ay dhibta xun u gaysteen dadka bani’aadamka ka ganacsadaa.
- Ama sharci lagu siiyay ka dib marka qofkii ku keenay uu kugu dhibay ama **kaala noqday sharciga**.

- Aad tahay **qaxooti** ama laguula dhaqmo siddii **qaxooti** oo kale. Tan macnaheedu waa:
  - Inaad tahay muhaajir "Mareykan-aasiyaan ah" kaa oo aabihii uu ahaa muwaadin Mareykan ah (US) oo ku noolaa Bariga-Koonfureed ee Aasiya xilligii sannadihii Dagaalkii Fiitnaam.
  - Soo gale Kuubaan ama Haytiyaan ah
  - Muhaajir gaar ah ee Ciraaqi ama Afganistaan ah
  - Qof uu milaratiga Mareykanku (US) ka soo daad-gureeyey Afganistaan mudaddii u dhaxeysay 7/31/21 iyo 9/30/22 (ilaa iyo inta mudadda saamixidu ka dhamaanayso)
  - Qof ehel dhow la ah dadkii laga soo daad-gureeyey Afganistaan ee kor lagu xusay oo saamixidii ka dib 9/30/22
  - Qof ka soo jeeda wadanka Yukreeyn oo ka baxay saamixidii mudaddii u dhaxeeysay 2/24/22 ilaa iyo 9/30/23

Intaa kadib waxaad tahay qof aan dhalasho haysan laakiin shuruudihii buuxiyay.

## Akhbaar kale

Hadii aadan ku jirin mid ka mid ah qolyahaa la qoray, ma heli kartid lacagta SSI.

Haddii aad ku jirto mid ka mid ah qoylahaa, wali waa inaad ka soo baxdo shuruudo ad-adag oo deganaanshaha ah oo la iska rabo. Eeg shaxanka halkan ku lifaaqan si aad u eegto inaad heli karto SSI iyo in kale.

Hadii aad qabtid su'aal ku saabsan SSI iyo dadk aan dhalashada, haysan la xiriir xafiiska qareenada ee degaanka ah ee 1-(877) 696-6529.


Ama ka eeg caawimaad barnaamijyadda kale ku jira barta: [www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics](http://www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics).



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**

**Waayahay, waxa aan ku jiraa mid ka mid ah qolyahaa muhaajiriinta ah ee la qoray. Marka ma helayaa SSI?**




**Fiiro Gar ah #1 – Wakhtiga Shaqada:** Wakhtiga uu ninkaaga/xaaskaagu shaqeeyay waxaa loo xisaabinyaa inaad adigu shaqaysay. Hadii aad wadanka timid adigoo caruur ah wakhtigii waalidkaa shaqeeyeen ee aad caruurta ahayd waa laguu xisaabin karaa. Arintan fahamkeedu wuu adag yahay. Sidaa darteed SSA wuxuu kaa caawinayaa si'aad u ogaatid wakhtigii aad shaqaysay.

Ma xisaabsan kartid wakhtigii shaqada ee ka dambeeyay bishii December 31, 1996 hadii ay dawladu ku siisay gargaar sida (AFDC, Food Stamps, SNAP, MA or MFIP) isla bishaas. Waydii waaxda SSA ama garyaqaan si'aad faahfaahin u heshid.

**Fiiro Gaara #2 – Askarta Hmong ah iyo askarta hawlgabka ah ee wadanka la keenay:**

Askarta Hmong ah ee la dagaal galay CIA markuu socday dagaalkii Fiitnaam looma tixgelinayo inay yihiin "Askar hore oo Maraykan ah" sida sharciga Maraykanku dhigayo.

Hadii aad tahay askari hore ciidamada maraykanka uga tirsanaan jiray ama aad weli ka tirsan tahay wadankana ku timid codsi ay qaraabadaadu ku soo codsadeen wixii ka dambeeyay bishii December 12, 1997, oo ay qaraabadaadu ku keentay, dawladu waxay u tixgelinaysaa in dakhligaa iyo hantida qofka ku keenay iyo lamaanihiisu ay yihiin dakhli iyo hanti aad adigu leedahay waana laguu xisaabinayaa. Waxaa laga yaabaa in taasi keento in dakhligaagu ka bato intii laguugu ogolaan lahaa SSI. Laakiin, hadaadan haysan cunto iyo hoy sababtuna tahay in qofkii ku keenay uuna ku caawinayn waxaa laga yaabaa in lagu caawiyo. Sidoo kale waa suurtogal in caawimo lagu siiyo hadii uu dhib kuu gaysto qofka aad is qabtaan ama waalidkaa isla markaana aad ka guurtay qofkii dhibta kuu gaystay sidaa darteedna aad caawimo u baahan tahay dhibta laguu gaystay darteed.